

Qalabka Sanduuqa WA Cares | Dhigaalka Bulshada

Linkiyo degdeg ah

- Sida loo adeegsado dhigaalkan 1**
- WA Cares iyo daryeelka muddada-dheer 2**
 - Daabacaada #1.....2
 - Daabacaada #2.....2
- Qaaraannada..... 4**
 - Daabacaada #1.....4
 - Daabacaada #2.....4
 - Daabacaada #3.....5
- Dheefaha..... 6**
 - Daabacaada #1.....6
 - Daabacaada #2.....6
- Ka-dhaafidda..... 8**
 - Daabacaada #1.....8
 - Daabacaada #2.....8

Sida loo adeegsado dhigaalkan

Dhigaalkan dheer waxaa loogu talagalay in loo adeegsado sida daabacado lagu daabaco baloog ama bog internet, email-lada shaqaalaha oo dhan, wararka wargeyska, dhigaal intranet-ka ku jira, iyo meel kasta oo kale oo aad dooneyso in ku bixiso macluumaad qoto-dheer oo ku saabsan WA Cares.

Si aad u hesho agabka qalabka oo dheeraad ah, oo ay ku jiraan jadwalka kaaladarka iyo soo-jeedimada, booqo wacaresfund.wa.gov/toolkit.

WA Cares iyo daryeelka muddada-dheer

Daabacaada #1

DAABAC SAWIR:



Soo-degso nuqulka tayadiisa sarreyso ee sawirkan.

DAABAC DHIGAALKA: Daryeel-bixinta qoyska waa asaaska daryeelka muddada-dheer. Gobolkeenna waxaa ka jira ku dhowaad 900,000 oo daryeelayaal qoys oo xubnaha qoyskooda ka caawinaya hawl maalmeedka sida qubeyska, cunista, dhar xirashada, cunto diyaarinta, soo iibsiga raashiinka iyo khudaarka, iyo waxyaabo kale. Sanduuqa WA Cares wuxuu taageeri doonaa daryeelayaasha qoyska wuxuunna fududeyn doonaa culeyska maaliyadeed ee daryeelka muddada-dheer ee shaqaalaha Washington marka ay gaboobaan. Wax badan ka ogow <https://wacaresfund.wa.gov>.

Daabacaada #2

DAABAC SAWIR:



Soo-degso nuqulka tayadiisa sarreyso ee sawirkan.

DAABAC DHIGAALKA: In kastoo 7 marka la eego 10 naga mid ah ay mar un u baahan doonnaan daryeelka muddada-dheer nolosheenna, inteenna badan ma lihin si aan isaga bixinno. Sababta oo ah daryeelka muddada-dheer ma ahan daryeel caafimaad, marnaba ma caymin caymis caafimaad ama Medicare. Si aad xaq ugu yeelato daryeelka muddada-dheer ee Medicaid, waa in aad keydka noloshaada yareysaa oo aad gaarsiiisa ilaa \$2,000 oo kaliya. Sanduuqa WA Cares waa dheef la kasbado oo ka dhigaysa caymiska daryeelka muddada-dheer mid ay awoodi karaan dhammaan shaqaalaha Washington marka ay gaboobaan. Wax badan ka ogow <https://wacaresfund.wa.gov>.

Qaaraannada

Daabacaada #1

DAABAC SAWIR:




**WA Cares contributions
begin July 1, 2023**

Soo-degso nuqulka tayadiisa sarreyso ee sawirkan.

DAABAC DHIGAALKA: Sanduuqa WA Cares waa barnaamij cusub oo dadka reer Washington ee shaqeynaya u suurageliya in ay helaan caymiska daryeel muddo-dheer marka ay u baahan yihiin. Shaqaalaha Washington ayaa \$36,500 ka kasbanaya caymiska daryeelka muddada dheer ee qofka noloshiisa oo dhan ah (si sannadle ah loo waafajiyo sicir-bararka) iyaga oo tabarrucaya 0.58% ee mushaarkooda inta lagu guda jiro sannadaha ay shaqeeyaan. Qaaraanka barnaamijka ayaa bilowda 1-da Luulyo, 2023. Wax badan ka ogow <https://wacaresfund.wa.gov/earning-your-benefits>.

Daabacaada #2

DAABAC SAWIR:



**WORKERS CONTRIBUTE
0.58% OF EACH PAYCHECK
TO WA CARES**

Soo-degso nuqulka tayadiisa sarreyso ee sawirkan.

DAABAC DHIGAALKA:

Sanduuqa WA Cares waa barnaamij cusub oo dadka reer Washington ee shaqeynaya u suurageliya in ay helaan caymiska daryeel muddo-dheer marka ay u baahan yihiin. Iyaga oo ku biirrinaya ama ku tabarrucaya 0.58% ee jeegga mushaar kasta inta ay shaqeynayaan, ayay reer Washington kasbanayaan \$36,500 oo caymiska daryeelka muddada-dheer noloshooda oo dhan ah (si sannadle ah loo waafajiyo sicir-bararka). Shaqaalaha Washington ee caadiga ah ee kasbanaya in ka badan \$50,000 sannadkii wuxuu ku biirrin doonaa ku dhowaad \$24 bil kasta. Wax badan ogow oo ka qiyaas qaado qaddarkaaga tabarruca bartan <https://wacaresfund.wa.gov/earning-your-benefits>.

Daabacaada #3

DAABAC SAWIR:

Meeting WA Cares Contribution Requirements

Contribute at least 500 hours per year for:

3 OF THE LAST 6 YEARS AT TIME YOU NEED CARE	OR	10 YEARS WITHOUT A BREAK OF 5+ YEARS	OR	AT LEAST ONE YEAR IF BORN BEFORE 1968
---	----	--------------------------------------	----	---------------------------------------

Soo-degso nuqulka tayadiisa sarreyso ee sawirkan.

DAABAC DHIGAALKA: Marka ay ku biirriyaan 0.58% ee jeeg mushaar kasta inta lagu guda jiro sannadahooda shaqeynta, shaqaalaha Washington waxay helaan \$36,500 oo ah dheefaha daryeelka muddada-dheer. Waxaad ku kasbaneysaa helitaanka dheefaha noloshada oo dhan adiga oo qaaraanka bixinaya ugu yaraan 10 sano iyada oo 5+ sano uusan joogsii jirin. Waxaad sidoo kale heli kartaa dheefo haddii aad qaaraanka bixinayso 3 sano oo ka mid ah 6dii sano ee la soo dhaafey laga soo bilaabo waqtigii aad codsatay. Dadka dhashey ka hor 1968kii ayaa waxay kasban karaan helitaanka noloshooda oo dhan ah ilaa 10% ee qaddarka dheefta dhammeystiran sannad kasta oo ay qaaraanku bixiyaan. Wax badan ka ogow <https://wacaresfund.wa.gov/wa-cares-benefits>.

Dheefaha

Daabacaada #1

DAABAC SAWIR:



Soo-degso nuqulka tayadiisa sarreyso ee sawirkan.

DAABAC DHIGAALKA: Marka ay ku biirriyaan 0.58% ee jeeg mushaar kasta Sanduuqa WA Cares, shaqaalaha Washington waxay helaan \$36,500 oo ah dheefaha daryeelka muddada-dheer. Ka-dib marka aad ka soo baxdo shuruudaha qaaraanka, marka aad daryeel u baahan tahay, waxaad si aan xaddidnayn u heli doontaa dheefahaaga isla markiiba iyada oo aan jirin waxyaabo lagaa jarayo iyo lacag-bixin la wadaago. Ku dhowaad saddex-meelood meel dadka ayaa daryeel u baahan sannad ama in ka yar, dadkaasina Sanduuqa WA Cares wuxuu awoodi karaa in uu caymiyo dhammaan daryeelka ay u baahan yihiin. Dadka qaar, WA Care ayaa qoysaska siisa gargaar degdeg ah iyo nasasho gaaban si ay u qorsheeyaan kharashka daryeelka mustaqbalka. Wax badan ka ogow <https://wacaresfund.wa.gov/wa-cares-benefits>.

Daabacaada #2

DAABAC SAWIR:



Soo-degso nuqulka tayadiisa sarreyso ee sawirkan.

DAABAC DHIGAALKA: Marka ay ku biirriyaan 0.58% ee jeeg mushaar kasta Sanduuqa WA Cares, shaqaalaha Washington waxay helaan \$36,500 oo ah dheefaha daryeelka muddada-dheer. In kastoo dheefaha WA Cares loo adeegsan karo in lagu bixiyo kharashka daryeelka goobaha degaanka ah sida rugaha lagu xannaaneeyo dadka waaweyn, waxay sidoo kale cayminayaan adeegyada iyo taageerada kaa caawinaya in aad guriga joogto – waxyaabaha sida tababarka iyo bixinta mushaarka daryeelaha qoyska, wax-ka-beddelka bedqabka guriga, cuntada guriga la keeno, gaadiidka, iyo tiknoolajiyadda dadka caawisa sida aaladaha ku xusuusiya daawooyinka. Wax badan ka ogow <https://wacaresfund.wa.gov/wa-cares-benefits>.

Ka-dhaafidda

Daabacaada #1

DAABAC SAWIR:




Soo-degso nuqulka tayadiisa sarreyso ee sawirkan.

DAABAC DHIGAALKA: In kastoo ku dhowaad dhammaan shaqaalaha Washington ay qaaraan WA Cares bixiyaan, ka-dhaafid ayaa la heli karaa oo loogu talagalay qaar ka mid ah kooxaha shaqaalaha kuwaas oo u badan in aaney adeegsan dheefahooda. Codsiyada ka-dhaafidda ikhtiyaariga ah ayaa waxaa heli kara shaqaalaha ku nool meel ka baxsan gobolka, xaasaska xubnaha ciidamada qabalka sida ee Mareykanka ee hawlgalka ku jira, shaqaalaha dalka ku jooga dal-ku-galka aan ahayn tan muhaajiriinta, iyo ciidamadii hore ee leh naafonimo la xiriirta adeegga heerkeedu gaarsiisan yahay 70% ama ka badan. Wax badan ka ogow <https://wacaresfund.wa.gov/exemptions>.

Daabacaada #2

DAABAC SAWIR:



Soo-degso nuqulka tayadiisa sarreyso ee sawirkan.

DAABAC DHIGAALKA: Shaqaalaha lahaa caymiska daryeel muddo dheer ee gaarka loo leeyahay marka ay taariikhdu ahayd ama ka hor 1-da Nofembar, 2021, waxay awoodaan in ay WA Cares Fund ka codsadaan ka-dhaafidda ilaa iyo 31-ka Disembar, 2022. Sida ku cad sharciga hadda, ka-dhaafidda waa mid joogto ah. Haddii aad horey u codsatay ka-dhaafidda caymiska gaarka loo leeyahay oo aadna ka heshay warqadda oggolaanshaha ESD, ka-dhaafidaada weli waa mid ansax ah. Uma baahnid in aad dib-u-codsatid, laakiinse waa in aad xaqiijisaa loo-shaqeeyahaaga in ay gal ugu jirto warqadaada ka-dhaafidda. Haddii aadan heli karin warqadaada, waxaad nuqul ka soo degsan kartaa akoonka Helidda Ammaanka ah ee aad u adeegsatay codsashada. Wax badan ka ogow <https://wacaresfund.wa.gov/exemptions>.